# QORSHAHA XIDHIIDHKA QOYSKA

TAKE WINTER BY STORM

## Samee Qorshaha Xidhiidhka Qoyska

**Waxa dhici karta in qoyskaagu aanu wada joogin marka masiibada duufaantu dhacayso. Qorshee sidaad war u heli lahayd iyo sidaad iskula xidhiidhi lahaydeen. Dib-u-eeg waxa aad samayn doontaan xaaladaha kala duwan.**

**Kala hadal** qoyskaaga iyo/ama asxaabta sida aad leysugu diyaariyo loogana jawaabo gurmadyada kuwaasoo aad ugu dhaw inay ka dhacaan halka aad ku nooshihiin, halka aad wax ka barataan, ka shaqaysaan ama ku ciyaartaan. Aqoonsada masuuliyadda saaran xubin kasta oo qoyskiina ka mid ah, waxaadna qorsheysaa inaad u wada shaqaysaan koox ahaan.

**Baro** sida loo isticmaalo farsamada si aad diyaar ugu noqoto cimilada duufaanta. Booqo bogga internetka www.TakeWinterByStorm.org si aad u hesho saadaasha Adeegga Qaranka Cimilada (National Weather Service) ee deegaankaaga, ilaha macluumaadka cimilada iyo si aad isaga diiwaangaliso siistemyada digniinta deegaankaada.

**Waydii** meelaha qoyskaagu tago hadday leeyihiin goob u cayiman qorshaha gurmadka. Dugsiyada, bixiyayaasha daryeelka carruurta, goobaha shaqada iyo abaarmenadu waa inay leeyihiin qorshe, yaqaanaan cidda ay la xidhiidhayaan qoysaska marka dhibtu jirto, kaydiyaana cunto, biyo iyo agabka kale ee aasaasiga ah oo ku filan. Xaqiiji haddii loo diyaariyey "hooy" haddii loo baahdo, iyo halka ay qorsheeyeen inay tagaan hadday noqoto inay baxaan. Ku dhaji macluumaadkan la xidhiidhka Qorshahaaga Xidhiidhka Qoyska (Family Communication Plan) iyo Kaadhka Xidhiidhka Gurmadka (Emergency Contact Card).

**Aqoonso** goob aad ku kulantaan oo dibadda ka ah xaafadda. Marka lagu jiro masiibo la xidhiidha duufaan, xubnaha qoyska waxa dhici karta inay isku goob joogin. Haddii ay dhacdo in xaafaddaada bubur ka soo gaarto dhacdo la xidhiidhaa duufaan, talada ugu wanaagsan waxay noqon kartaa in aad ku kulantaan meel ka baxsan xaafadda. Sidoo kale, tani waxay noqon kartaa meesha ugu fiican ee aad ku kulantaan haddii ay dhacdo in xubnaha qoysku kala maqan yahiin. Baro lambarka tilifoonka iyo macluumaadka la xidhiidhka qoyskaaga, meesha ay ku kulmaan ee dibadda ka ah xaafadda.

**Aqoonso** xidhiidh dibadda ka ah mandaqada. Masiibada kadib, waxaa in badan leysku haleyn karaa khadadka tilifoonada masaafadda dheer beddelkii kuwa deegaanka. Waydiiso saaxbiib ama qaraabo ku nool dibadda gobolka Washington inay noqoto "xidhiiriyaha qoyskaaga." Masiibada kadib, xidhiiriyaha qoyskaagu wuxuu noqonayaa bar xidhiidheed si aad u wadaagtaan macluumaadka dhammaantiin. Qorshahaagu wuxuu ku xidhan yahay in qof kastaa garanayo lambarka tilifoonka xidhiiriyaha.

**Dhammaystir Qorshaha Isgaadhsiinta Qoyska** ee ku yaal bogga xiga kuna dhaji meelaha qoyskaagu ku qaataan wakhtiga intiisa badan.

**Dhammaystir Kaadhka Xidhiidhka Gurmadka,** waxaadna gelisaa gudaha dhammaan agabka diyaarawga, xarunta isgaadhsiinta guriga, baabuurka iyo goobta aad ka shaqeysid ama dugsiga. Waxaad kaararka kala soo bixi kartaa TakeWinterByStorm.org.

**Waxaad** dhamaan lambarada xidhiidhka gurmadka gashataan tilifoonadiina kadibna hayso liiska, sababtoo ah waxaa dhici karto in qofka uu heli waayo buuga ciwaanka. U sheeg xidhiidhkaaga gurmadka deegaanka iyo xidhiidhka mandaqadda dibadda ka ah ee aad ku qoratay liiska xariirka degdegga ee dibadda ka ah deegaanka. Hubso in goobta kulanka ee dibadda ka ah xaafadda leedahay tilifoon lagala xidhiidho.

**Isticmaalo** farriimo qoraal ah haddii carqalad soo gasho shabakada taasoo sababta in telefoonada shaqeyn waayaan. Ma shaqeyn doonaan tilifoonada aan ku shaqeynin fiilada haddii korontadu maqan tahay. Tilifoonada ku shaqeeyo fiilada (loona yaqaan kuwa mara dhulka) ayaa ah kuwa aad leysugu haleyn karo.

**Xogogaal ahaw.** Daar janalada warbaahinta deegaanka si aad u hesho wararka iyo tilmaamaha muhiimka ah ee ugu dambeeyey. Booqo **TakeWinterByStorm.org** si aad u hesho meelo aad kala xidhiidho sida la iskaga diiwaangaliyo siistemyada digniinta deegaankaada.

**Caruurtaadu ha ku luglahaadaan isu diyaarinta gurmadka. Booqo TakeWinterByStorm.org si aad caruurtaada ugu hesho cayaaraha xiisada leh iyo ilaha waxbarashada.**

# QORSHAHA XIDHIIDHKA QOYSKA

TAKE WINTER BY STORM

Hubso in qoyskaagu qorshe leeyahay haddii lala kulmo degdeg. Ka hor inta aanu dhicin gurmad, wada fadhiista oo go'aamiya sida aad u xidhiidhi doontaan, halka aad tagi doontaan iyo waxa aad samayn doontaan xaaladda gurmadka. Ku hayso nuqul ka mid ah qorshahan agabkaaga gurmadka ama meel kale oo ammaan ah halkaas aad ka heli kartaan hadday dhacdo masiibo.

Magaca Xidhiidhiyaha Dibadda ka ah Magaalada: ____________ Lambarka Tilifoonka: ____________

Emailka: ____________

Goobta Lagu Kulmo ee Xaafadda: ____________ Lambarka Tilifoonka: ____________

Goobta Lagu Kulmo Gobolka: ____________ Lambarka Tilifoonka: ____________

Goobta Daadguraynta: ____________ Lambarka Tilifoonka: ____________

Buuxi macluumaadka soo socda ee la xariira xubin kasta oo ka tirsan qoyska ah, waana in aad casriyeysaa.

Magaca: ____________ Lambarka Sooshal Sikiyuuriti: ____________
Taariikhda Dhalasho: ____________ Macluumaadka Caafimaadka ee Muhiimka ah: ____________

Magaca: ____________ Lambarka Sooshal Sikiyuuriti: ____________
Taariikhda Dhalasho: ____________ Macluumaadka Caafimaadka ee Muhiimka ah: ____________

Magaca: ____________ Lambarka Sooshal Sikiyuuriti: ____________
Taariikhda Dhalasho: ____________ Macluumaadka Caafimaadka ee Muhiimka ah: ____________

Magaca: ____________ Lambarka Sooshal Sikiyuuriti: ____________
Taariikhda Dhalasho: ____________ Macluumaadka Caafimaadka ee Muhiimka ah: ____________

Magaca: ____________ Lambarka Sooshal Sikiyuuriti: ____________
Taariikhda Dhalasho: ____________ Macluumaadka Caafimaadka ee Muhiimka ah: ____________

Qor halka qoyskaagu ku qaato waqtiga badankiisa: shaqada, dugsiga iyo meelaha kale ee aad tagto. Dugsiyada, bixiyeyaasha daryeelka ilmaha, goobaha shaqada iyo abaarmenada dhammaan waa inay yeeshaan goob u cayiman qorshayaasha gurmadka adiga iyo qoyskaagu u baahan tihiin inaad wax ka ogaataan.

**Goobta Kowaad ee Shaqada**

Cinwanka: ____________
Lambarka Tilifoonka: ____________
Goobta Daadguraynta: ____________

**Goobta Labaad ee Shaqada**

Cinwanka: ____________
Lambarka Tilifoonka: ____________
Goobta Daadguraynta: ____________

**Meesha Kale ee Aad Tagto**

Cinwanka: ____________
Lambarka Tilifoonka: ____________
Goobta Daadguraynta: ____________

**Goobta Kowaad ee Shaqada**

Cinwanka: ____________
Lambarka Tilifoonka: ____________
Goobta Daadguraynta: ____________

**Goobta Labaad ee Shaqada**

Cinwanka: ____________
Lambarka Tilifoonka: ____________
Goobta Daadguraynta: ____________

**Goobta Saddaxaad ee Shaqada**

Cinwanka: ____________
Lambarka Tilifoonka: ____________
Goobta Daadguraynta: ____________

| Macluumaadka Muhiimka ah | Magaca | Lambarka Tilifoonka | Lambarka Ceymiska |
|---|---|---|---|
| **Dhakhtarka (Dhakhtarada)** | | | |
| **Wax Kale** | | | |
| **Farmashiistaha** | | | |
| **Caymiska Caafimaadka** | | | |
| **Caymiska Guriga** | | | |
| **Dhakhtarka Xoolaha/Kennel** | | | |